



# Countywide Planning Policies

## Housing



King County

### Dulmarka

Cutubka Housing (Guriyaynta) ee **Countywide Planning Policies** (CPPs, Xeerarka Qorshaynta ee Degmada oo Dhan) ayaa halbeeg u sameeya dhammaan maamulada inay abuuraan qorshe ayna hormariyaan heerka dookhyada guryo qiimo jaban, la heli karo, oo caafimaad u leh dadka deegaanka ee hadda iyo kuwa mustaqbalka. Xeerarkan waxaa higsii siyaan nidaamyada maxaliga ah ayagoo raacaaya hanaan afar talaabo ah:

1. Samaynta kaydka iyo qiimaynta baahiyaha iyo xaaladaha guryaha;
2. Dhaqan gelinta xeerar iyo xeelado wax looga qabanaayo baahiyaha aan la buuxin;
3. In la cabiro natiijoyinka; iyo
4. In looga jawaabo cabirka dib u qiimayn iyo wax ka badalka xeeladaha.

Qorshaha jiray ee CPP ayaa ka hadlaaya helitaanka guryaha, qiimaha jaban, iyo kala duwanaanshaha, iyo sidoo kale hormarinta guryaha meel u dhaw gaadiidka iyo xarumaha shaqada. Waxay sidoo kale taageeraan wada shaqaynta gobalka oo ah farsamo xal loogu helo ciladaha wadanka oo dhan.

### Isbadalada Xeerka

Isbadalada lasoo jeediyay ee lagu samaynaayo cutubka Housing ayaa waafaqsan qorshayaasha horay u jiray, ayna ku jiraan VISION 2050 (HIGSIYADA 2050) iyo [warbixinta 2018 Regional Affordable Housing Task Force \(Gudigga Heer Gobalka ee Guryaha Qiimaha Jaban oo la aasaasay 2018\)](#), waxay xoojinayaan qaababka isla xisaabtanka gobalka iyo deegaanka, iyo in laga guul gaaro natiijoyinka caafimaadka iyo sinaanta. Tan waxaa ku jira in diirad dheeraad ah la saaro buuxinta baahiyaha guryaha ee soo badanaysa ee qoysaska aadna danyarta u ah, dayarta faqiirka ah, iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo, gaar ahaana guryo loo asteeyay dadka danyarta ah, iyo sidoo kale isku xirida fikradaha muhiimka ah ee sinaanta sida kahortaga iyo yaraynta barakaca iyo balaarinta helitaanka loo siman yahay ee guryaha iyo dookha xaafada.

Isbadalada lasoo jeediyay ee xeerku waxya sidoo kale hagaan maamulada maxaliga ah si ay usii xoojiyaan sinaanta iyo natiijada caafimaadka oo lagu daraayo qorshayaasha balaaran. Waxay wax ku dhisaan CPP ga 2012 si loo abuurto barnaamij dabagal ah oo lagu sameeyo xogta maxaliga ah iyo tan gobalka. Isbadalada lasoo jeediyay ayaa qeexaaya qiimaynta baahiyaha guryaha iyo shuruudaha warbixinta ee heer degmo iyo heer gobal si looga caawiyo in qiimayn fiican lagu sameeyo hormarka ku aadan wax ka qabashada masiibada guryaha qiimaha jaban.

### Samaynnada Isbadalada Xeerka

- Waxay muhiimada saartaa baahida guryo qiimo jaban ay u qabaan dadka aadka faqiirka u ah, aadna u danyar, iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo.
- Waxay qiimeeyaan waxtarka xeeladaha guriyaynta si loo buuxsho baahiyaha degmada oo dhan.
- Waxay u baahan tahay in maamuladu qoraan farsamooyinka taariikhda maxaliga ah iyo kuwa isir sooca iyo takoorka ee isticmaalka dhulka ayna dhaqan gashaan xeelado wax looga qabanaayo saamaynadaas laguna bogsiiinaayo dhibaatooyinkii hore.
- Waxay kordhisaa dookhyada guryaha ee qof kasta, gaar ahaana dadka mushaarka yar, u dhaw gaadiidka iyo shaqada.
- Waxay kor u qaadaysaa dajinta xeerarka ka dhanka ah barakicinta.
- Waxay kormeertaa hormarka ku aadan buuxinta higsiyada guriyaynta ee degmada oo dhan waxayna bixisaa xog ku saabsan talaabooyinka guriyaynta ee [King County Affordable Housing Dashboard \(Bogga Hore ee Guryaha Qiimaha Jaban\)](#).

### Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, fadlan iimeel u dir [gmpc@kingcounty.gov](mailto:gmpc@kingcounty.gov) ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

### Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPP waa taxanayaalka xeerar maamula ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorshaynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaalooyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuurto xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalo kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo VISION 2050.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaqaan](#).